



FURUQA GEELA

Afka Ingriisiga waxaa lagu yiraahdaa Camel Pox

Cudurka : Keenaha iyo Baahsanaanta

Cudurka **Furuqa Geela** waxaa keena nooc ka mid ah **Fiiruska** kuwa ka tirsan bahda loo yaqaan **Poxviridae**.

Furuqa Geelu wuxuu ka dhaca qaaradda Afrika iyo tan Ashiya labada meelaha geela lagu dhaqo, oo ay ku jiraan dhulka Geeska Afrika ee Soomaalidu degto.

Furuqa Geelu wuxuu ku dhacaa geela labadiisa nooc ee adduunka jiraba ; nooca leh labada kurus iyo kan leh kuruska keliya. Wuxuu **Furuqa Geelu** ku dhici karaa oo kale **dadka**.

Gudbinta iyo Saamaynta Cudurka

Furuqa Geelu wuxuu ka mid yahay cudurada sida ugu dhakhsaha ama degdegta badan u fida ama ugu baaha geela.

Habka ugu muhiimsan ee xooluhu isugu gudbiyaan cudurkani waa kan **tooska** ah ; markii neef ama geel buka iyo qaar fayow is dhex galaan oo istaabtaan cudurkeenihiina isaga gudbo. Waxaa kale oo cudurkeenuhu ugu kala gudbi karaa si aan toos ahayn markii walax sadeexaad u kala qaado.

Marka neefka jidhkiisa cudurkeenuhu galo iyo inta ay ka muuqanayaan astaamaha u horeeya ee cudurka oo ah mudada loo yaqaan **incubation period** waxay dhan tahay 10 ila 15 maalmood

Furuqu wuxuu ku dhacaa geela da'kasta wuxuuse aad wax u yeela da'yarta ama aaranka (3 jirka iyo inta ka yar).

Dadku wuxuu ka qaadi karaa cudurkan markii ay taabtaan neef buka

Astaamaha / Calaamadah Cudurka

Cudurka **Furuqa Geela** astaamaha lagu garto waxaa ka mid ah :

- Dhogor madoobad ama gan-gan ku jabsan neefka (cadar)
- Daaqa oo uu yareeyo
- Xumad ama qandho sare
- Finan ka soo baxa korka neefka
- Finanka oo biyo ama dheecan yeesha
- Finankaas oo dilaaca ama burura
- Finankii dilaacay oo nabaro noqda
- Nabaradaas oo caabuqa ama qolofaysta

Finanka furuqu waxay ka soo bixi karaan ama ka soo yaacaan neefka korkiisa oo dhan waxayse u badan yihiin madaxa.

Furuqu wuxuu aad wax u yeela geela da'da yar kuwaas oo ay dhici karto in dhimashadu gaadho boqolkii shan (5%) ama ilaa boqolkiiba soddon (30%)

Markay finanku madaxa ka soo baxaan siiba agagaarka afka iyo indhaha waxay keeni karaan madaxa oo barara, iyo indho beel (fiiri sawirka hoose)

Daaweynta iyo ka hortagga

Maadama keenaha cudurkani yahay **Fiirus (Virus)** malaha daawo u gaar ah. Nabarada ka soo baxa neefka buka markii jeermiska Baakteeriyadu gasho oo ay caabuqaan ama suulaan waxaa lagu daweyn karaa daawooyinka loo yaqaan **Antibiotiga** Soomaali badanina u taqaan **OKSta** sida **Oxytetracycline** ha ahaato mid lagu buufiyo nabarada ama mid lagu mudo neefka.

Furuqa neefka ka bogsoodey wuxuu u yeesha adkaysan ama wuu talaal qaataa mar kalena kuma dhaco. Nirgaha yar-yari waxay dambarka hooyada ka heli karaan walax talaal ama adkaysan u siin kara cudurka furuqa.

Si loo xakameeyo ama looga hortago **Furuqa Geela** waxaa loo baahan yahay in la fuliyo talaabooyinka soo socda :

- Maamulka iyo dhakhaatiirta xoolaha oo la wargelyo
- Isu socodka xoolaha oo la xayiro ama si cilmiyaysan loo maamulo
- Xoolaha buka oo laga sooco inta kale lagana ilaaliyo.


Qaaradan Afrika ma jiro talaal loo isticmaalo **Furuqa Geela**, waxaase jirta in wadankii la odhanjirey Midowga Soofiyeeti uu samaynjirey talaal Furuga Geela loo isticmaalo

Markii neef furuq ku dhacay ka bogsoodo cudeurkaas, nabaradii uu ka tegey waxay noqdaan kuwo aan bi'in kana muuqda korka neefkaas inta uu noolyahay.

Furuqa Geelu wuxuu keeni karaa dhibaato weyn oo dhaqaale, taas oo ka kooban ; dhimasho uu geela qaar laayo, cadka iyo caanha geela oo yaraada iyo suuqgeynta (gudaha iyo dibeddaba) oo xanibanta.



Nirgo ka bogsoodey cudur u eg Furuq



Neef geela oo furuq ku dhacay indhahan mid ka ridey

Cudurada u eg Furuqa

Waxaa jira cudur ku dhaca geela oo aad ugu eg furuq loona baahanyahay in la kala garto. Cudurkaas waxaa afka qalaad lagu yiraahdaa **Contagious ecthyma** ama **Orf** Soomaaliduna waxay u taqaan magacyo badan oo kala duwan oo ay ka mid yihiin ; Afruur, Canfaruur iyo kuwo kale.

Afruur waxaa keena fiirus ay isu dhow yihiin kan keena furuqa geela wuxuuna ku dhacaa badanaa nirgaha ama aaranka jiry 3 sanno iyo ka yar (eeg sawirkan hoose)



Nirig uu ku dhacay cudurka Afruur (Orf) oo lagu buufiyey daawo